



Hadaad wawal ka qabto: Gorma ama Habke loo codsada Qimeynta Qorshaha Waxbarashada Gaar-ahaneed Ilmahaga yar

(If You Have Concerns: When and How to Request a Special Education Evaluation for Preschool Child - Somali translation)

Waalid ahan, waxa laga yaba in aad walwal ka qabto kobcidda ilmahaaga yar. Waxa laga yaba in aad ka walwalsantahay in ay dib u-dhac leyihin ama eysan u koreyn sida ilmaha kale oo eysan gareyn halki laga rabay. Malaha ilmahaaga wey ku adagtahay in ay bartan xirfadaha muhiimka ah. In kasto waalidku ugu aqoon badanyahay ilmahooda, walidiinta oo dhan ma garanayan halka laga raadsado cawinad qiimeyn iyo howlaha la xiriira. Kuwan so socda wa baaq ku saacidaya.

Baaq#1aad: Weydi dadka kale ee ilmahaaga garanaya

Dhaqtarka ilmahaaga ama macalimiinta dugsiga xanaanadda aya akhbaaro muhiim ah ku siin kara ilmahaaga habka kobcayano ay ula qabsanayan mulamilaadka jawiga fasalka. Dhaqtarka ilmahaaga la shaqeeya ee eega hab-kobcidda sanadeed aya talo ka siin kara. Hadi qof ka mid ah dadkan taqasuska ah ku yirahdan walwal ban ka qabna, waxad weydisa in ay ku shegan mitaalo qaas oo qeexaya waxey ilmahaaga ku arken. Waxad kalo weydisa hadi ay garanayan xeelado ay horey u tijaabiyen, oo saacidi kara ilmahaaga. Akhbaaradan wa kuwa ku saacidi kara in ilmahaaga horumarkooda ayaha.

Baaq#2aad: La xiriir xarumaha kheyraadka bixiya

- Barnaamijka lo yaqan Help Me Grow wa barnaamij lacag la'aan ah, ee kheyraad u fidiya waalidka iyo dadka taqasuska, hadey walwal ka kobaca ilmaha yar. Markad la xiriirto Help Me Grow, shaqaalaa la shaqeeya ilmaha yar ee dugsiga degmada aad degantahay aya si toos kula so xiriiraya, oo kaala falanqonaya walwalka aad qabto, iyo talaabadaha xigi kara. Tani waxa ka mid noqon kara baaris ama qiimeyn. Halka aad kala xiriiri karto Help Me Grow <http://helpmegrowmn.org/HMG/Refer/index.html> ama (866) 693-GROW (4769).
- Qiimeynta hore ilmaha wa barnaamij lacag la'aan ah, ee Minnesota, ee eega habka ilmahu u kobcayan iyo koriinkoda. Eegistu waxey horseedeysa natiijyo koriimo wanaag leh, oo waxey ku horseedi karta fursado waxbarsho waqti hore. Eegistu waxey diyaar u tahay ilmaha markey 3 jirsadan. Xiriirka barnaamijka eegista ee kugu dhow waxad ka heli karta qadka Wasaaradda Waxbarashada ee Minnesota <https://education.mn.gov/MDE/fam/elsprog/screen>

Baaq#3aad: Codso qiimeynta waxbarashada gaar-ahaneed

Ilmaha yare e u qalma howlaha waxbarashada gaar-ahaneed, waxa loo fidiya cawinaad iyo adeegyo shaqsiyeed. Adeegyada oo loogu fulinayo halka ay kooxda waxbarashada gaar-ahaneed isla garato in ay munaasab ku tahay in ilmahu ku helaan, iyado la xoojinayo waqtiga ilmaha la mucaamiltimo ilmaha kale ee aan dib u-dhaca laheyn. Caawinaadan iyo adeegyadan waxey ilmaha ka saacidayan in ay bartan xirfadaha aysan laheyn dib dhaca daradiis. Kuwan waxa ka mid noqon kara:

- La mucaamiltanka ilmaha kale iyo dadka waweyn

- Fahamka qeynuunka iyo sharciyada fasalka iyo timaan raaca macalimiinta ama shaqaalaha la shaqeya ilmaha yar
- Ka gudubka xarakaad, ee u gudubka xarakaad kale, ama u foojignaanta xarakaadka ama howl
- Barashada ama fahamka maclumaadka fasalka xanaanada, sida tirade ama midabada, taso marmarka qaarkod shaqsi ahan lo barayo
- Hadalka ama kelmadaha oo si fasiix ah lo yiraahdo, si ay ardeyda kale ama dadka waweyn u fahman
- Bartan xeelado ay isku xakami karan dabecad ahaan, iyo in ay tilmaami karan oo sheegan karan dareenkooda

Hadii aad wax walwal oo dhinac walba ka qabto kobaca ilmahaaga, waxaad xaquuq sharciyeed u leedahay in aad codsato qiimeynta waxbarashada gaar-ahaneed.

- Wa muhiim in codsigaagu noqda qoraal, oo aadan hadal keliya codsigaga ku bixiso:

(Halkan ku qor tariiqda malinta)

(Magaca maamulaha dugsiga, Magaca ilmaha iyo waqtiga ay dhasheen)

Mudane (Magaca maamulaha):

Waxaan degmadda dugsiga ka codsanaya in ay qabato qiimeyn waxbarasho buuxda oo dhameystiran, si lo xaqiijiyo in ilmaheygu u qalman adeegyada waxbarashad gaar-ahaneed.

Waxan walwal ka qaba ilmaheyga kobacoda. Waxyaabaha walwalka iiga jira waxa ka mid ah habka ilmaheyga dhib ugu qaban [Mitaall'o ah: dhaqankooda; qeynuun racooda; Tilman racooda; fojignantooda; xiriirkooda; hadalkooda; dareen shegashadoda; saxiib la dhaqankooda; iwm.].

Hadlan ila soo xiriir si aan uga wada hadalno walwalka aan qabo, oo aan u qorsheyno qiimeynta waxbarasho.

Waxad igala so xiriiri karta cinwaanka hoos ku qoran, ama telefonka _____.

Wa ku mahadsan tahay cawinadda,

(Saxiix halkan)

(Halkan ku qor magacaaga, cinwaanka guriga, magaalada, gobolka, Zip-ka)

- Keydso kobi ah waraaqaha aad ku wada xiriirtan, iyo tariiqda aad dirtay.
- Mar hadaad codsigan dirto, degmada dugsiga waxa ku qasab ah in ay kaaga so jawaabto, oo ay ku so dirto foom kula socodsintaya sababta ay codsigaga qiimeynta waxbarasho ku yeeshay ama ku diiday, iyo waxa ay degmadu ku talineyso in ay aqbalsan tahay ama diidan tahay. Foomkan waxa loo yaqan Ogeysiinta hore ee Qoraalka ah (Prior Written Notice PWN).
- Hadi degmadu ogtahay ama ay ka shakineyso in ilmahaaga dib-udhac leeyahay, wa in codsiga qiimeynta iyadu fuliso. Hadi degmaduaminsantahay in ilmahaagu u qalmin adeegyada waxbarashada, wa in ay foomka ogeysiinta hore ee qoraalka ah ku cadeysa in qiimeyntu khilaafsantahay.
- Fomka Ogeysiinta hore ee Qoraalka ah waxa ku wehliya foom kale ee la yiraahdo foomka Ogolaansha/diidmada ee waalidka (Parent Consent/Object form) Foomkan ayad isticmaleysa in aad ku waafaqsantahay ama ku diidantahay go'aanka degmada. Intan qiimeynta la bilaabin, wa qasab in ay waalidka ogolaansho bixiyaan hadey tahay qiimeynti ugu horeysa. Fadlan sida ugu dhaqsaha badan foomkan dib ugu dir degmada markaad go'aan gaarto, sababto ah degmadu ficil ma qaban garto go'aankaga la'aanti.

Baaqa # 4aad: Wac hey'adda PACER

Hadii aad walwal ka qabto koboca ilmahaaga ama amuurahooda xagga dugsiga xanaanada, halka ilmaha lagu xanaaneyo, keli kuma tihid. Waxad la so xiriiri karta hey'adda PACER, shaqaalaha u dooda adeegyada ilmaha yar, oo ka caawin kara nidaamka, ama ku fahamsiin kara. Hey'adda PACER waxey xaqijisa in ilmaho dhan helan fursad heerka ugu sareeya ay ku gaari karaan. La so xiriir PACER [PACER.org](https://www.pacer.org) ama (952) 838-9000.